

# Ma baabuur baad iibsanaysaa?

Guddiga Shirkadda Baabuurta ee Alberta, AMVIC, waa hay'adda u qaabilsan sharciyaynta shirkaddaha baabuurta ee Alberta. AMVIC waxay dardargelisaa sharciyada macmiilka lagu dhowro oo waxay hubisaa in macmiisha si caddaalad ah lagula dhaqo.

- Dhammaan ganacsiyada baabuurta oo ay ku jiraan kuwa baabuurta iibiya, deemiya, dayactirra/sameeya, kuwa ku shaqaysta ee rarka iyo wakiilka/dalaalka waa in dhammaantooda ay AMVIC ay shati kala yimaadan.
- Waa sharci daro kuwa baabuurta ka ganacsada oo Alberta ka howl galo iyagoon shati aysan ka haysan waaxda u qaabilsan ee AMVIC.
- AMVIC waxay ku talinaysaa in aad wax ka iibsato kuwa shatiga ka haysta AMVIC ee baabuurta iyo wixii la xiriira iibiya.
- Booqo bogga internetka ee amvic.org si aad u ogaato kuwa shatiga haysta ama kuwa baabuurta iibiya oo haysta shatiga saxda ah.

## 4 XAQIIQOOYIN OO LOO BAAHAN YAHAY IN AAD OGAATO

ka hor inta aadan wax ka iibsan

### XAQIIQDA: Mar haddii heshiiska iibsiga aad saxiixdo, iibsiga waa kama dambeys

Iibsiga jooji ka dib marka aad saxiixdo heshiiska wax kala iibsiga. Mar alla marka aad saxiixo heshiiska wax kala iibsiga baabuurka, oo shuruudaha kala iibsiga la buuxiyo, iibkii kama dambeyska wuuu dhacay. Xitaa haddii adigu wax iskaa "beddellaan" ama aad "hesho qiimo ka wanaagsan" qofka gaariga kaa iibiyay ama [dealer] ka heshiiska waa meel marin karaa. Iska hubi inaad aqriso oo aad fahamto dhammaan waxyaabaha dukumeniga ku qoran ka hor inta aadan saxiixin oo adigana nuqdiga heshiiska ka reebo.

### XAQIIQDA: Dhammaan sicirrada oo dhan waa sharci

Goorta qofka shatiga u haysto ee AVIC ee uu iibka baabuurta uu dacaayadaynaayo qiimaha gaariga waa in lagu daraa oo ay la socotaa dhammaan lacagaha [fee] ga ah ee laga rabo qofka wax iibinaya qorshaynaayo inuu qofka wax ka iibsanayo uu ku dalacayo ee waa qarashaadka la socda iibsiga.Lacagta kaliya ee gadaal loogu darayo waa inay ahaataa lacagta canshuurta ah ee GST iyo qarashka kale ee lacagta daynta.

Haddii aad jeceshahay in aad ku darto dalabyo dheeraad ah, damaanad \[warranty], ama waxyaabaha kale ee gaariga lagu daro, qiimaha la dacaayadeeyay wax baa laga baddali doonaa.

**XAQIIQDA: Baabuurta la iibsado shaqsi gaar ah waa halis**

Qiimo yar gaari lagu iibinnayo markastaaba ma ah [deal] fiican. Haddii aad doorato in qof shaqsi ah aad baabuur ka iibsato waxaad halis ugu jiraa in gaariga aad iibsanaysid wuxuu noqon karaa gaari la soo farsameeyay. Kuwa baabuurta farsameeya waa kuwa shati aan u haysan oo iskaa dhiga kuwo wax ku iibiyo goobo u eg meel sharciyaysan ama iskaa dhiga dad baabuur iyaga ay iska leeyihiin kaa iibinnaya. Kuwa baabuurta farsameeya waxaa dhici karta in ay kaa iibinnayaan baabuur qariban, meelka uu sheegayo wax laga soo baddelay oo xitaa waxaa dhici karta baabuurka inuu yahay baabuur la soo xaday.

Ganacsiyada shatiga u haysta waxay u hogaansan yihiin in ay raacaan sharciyada macmiisha ilaaliya ee gobolka Alberta ka jira. AMVIC waxay leeday oo ay gacanta ku haysaa sanduuq xaq siin oo loogu talagalay kaliya macmiilka baabuurka ka iibsada ganacsiyada shatiga u haysta.

**XAQIIQAHA: Lacagaha la dhigto [deposit] markastaaba ma ahan kuwa dib loo soo celiyo**

Waxaa aad muhiim u ah in aad iska caddayso oo aad fahamto sababta ka hor inta ganacsiga aadan lacag dhigasho aadan dhiibin. Waydii haddii lacagta aad dhigayso ay tahay lacag la soo celin karo [refund] ama ay tahay lacag aan la soo celinnayn [non-refundable] iyo waxa ay yihiin shuruudaha la isku xiro. Mar walba ku camcami in aad kala saxiixataan qoraal lacag dhigashada oo rasiidna lagu siiyo- oo labada nuqdi iska xafad oo meel fiican dhigo. Barta internetka AMVIC ee amvic.org waxaa ku jira oo aad ka helaysaa foorm qoraal ah oo ah heshiiska lacagta la dhigayo.

**WAA BARTAADA AAD KA HELAYSO XOGTA IYO ILAALADA MACAAMIILKA**

MA QABTAA WAX SU'AALLO?

MA JIRAA WAX TABASHOOYIN AH OO AAD QABTO?

Haddii aad qabto wax tabashooyin ah oo ku saabsan iibsiga baabuurta AMVIC ayaad ula soo xiriiri kartaa si kaalmo aad uga hesho, iyadoo kaalmada ay tahay mid bilaash ah.

TELFOONKA LAMBARKA WAA: 780-466-1140
QATKA BILAASHKA: 1-877-979-8100
www.amvic.org

AMVIC
ALBERTA MOTOR VEHICLE INDUSTRY COUNCIL